# TACADDIGA U QALMITAANKA LAGU LUMIN KARO
## Shakhsiyaadka Mawduuca Bixiyaha ee ODHS|OHA

Warqaddani waxay sharraxaysaa tacadiga keeni kara u qalmitaan la'aanta. Unuga Baaritaanka Sooyaalka (BCU), ee u adeega Waaxda Adeegyada Aadamaha ee Oregon (ODHS) iyo Maamulka Caafimaadka ee Oregon (OHA), waxay sameysaa baaritaan tacaddi oo ka qayb ah baaritaanka sooyaalkaaga. Baaritaanka sooyaalka waxaad ka tahay qofka loo dan leeyahay (SI).

Tacaddiga waxa ku jira baaritaan kasta oo warbixinta laga buuxiyay ay heshay ODHS ama OHA. SI-yada qaarkood, tacaddiga waxa ku jira xogta tacaddiga ilmaha ee gobolada kale ka socota.

Haddii xuquuqo dib u eegiseed ama racfaan la siiyo qofka dulmiga ku eedaysan (si kale, adiga), BCU waxay tacaddiga u tixgelin kartaa mid lagu waayi karo u qalmista haddii xuquuqdan la dhammeystiro ama laga gudbo.

***Haddii aad ku kacday tacaddi u qalmitaanka lagu waayi karo, BCU waxay dib u eegis ku samayn doontaa tafaasiisha iyo macluumaadka ku saabsan tacaddiga ka hor intaan go'aanka ku habboonaanta ee taariikh hubintaada la gaarin.***

**<u>Tacaddiga U Qalmitaanka Lagu Lumin Karo ee Dadka Waawayn</u>**

Ku tacaddiga qof wayn oo nugul (dadka qaba naafonimo dhanka koritaanka ah, jirro maskaxeed daran, ama naafo xubnaha jirka ah; iyo dadka waawayn 65 sannadood jir ka wayn) waa mid u qalmitaanka lagu lumen karo haddii dhammaan waxyaabaha soo socda run yihiin:

- Baaritaanka tacaddigu bilaabmay markay ahayd ama ka dib Janaayo 1, 2010.
- Natiijada baaritaanku xaqiijisan tahay.
- Baaritaanka tacaddiga lagu ogaaday inaad ka mas'uul tahay tacaddiga. Baaritaanka dhexdiisa, laguugu yeedhay dambiilaha eedaysanaha ah, dambiilaha la soo gudbiyay, ama muddici. Haddii tacaddiga lagu helay guri xannaano dadwayne, uu shati haystuhu yahay qofka ka masuulka ah tacaddiga.
- Nooca tacaddigu uu yahay dayacaad, tacaddi maaliyadeed, tacaddi gacanqaad ah, tacaddi galmo loona tixgeliyay inuu khatar ahaa.

**<u>Tacaddiga U Qalmitaanka Lagu Lumin Karo ee Carruuta</u>**

Haddii ODHS ama OHA baarto tacaddi carruur loo geystay oo natiijo muujinaysa tacaddi, caddayn leh, oo xaqiijisan la helo, waa tacaddi ilmeed u qalmitaanka lagu lumin karo:

- Iyada oo aan loo eegin nooca tacaddiga (hanjabaad waxyeelo, gacanqaad, mid maskaxeed ama hadala, dayacaad, kormeeris la'aan, si xun ula dhaqan, imw).
- Iyada oo aan loo eegayn xilliga uu dhacay (wuxu ahaanayaa tacaddi u qalmitaanka lagu waayi karo inta xog ku saabsan la hayo).

<u>Qodob Xasuus Mudan oo ku Saabsan Caafimaadka Dabeecadda/Maskaxda ee SI-yada</u>: Haddii aad tahay kaabaha daryeelka shakhsiga ah ama aad ku lug leedahay guryaha xannaanada dadka waaweyn (qofka shatiga ku qoran, maamulaha hoyga, daryeelbixiye, tabaruce, ama xubin qoyska ka tirsan), waa lagu marinayaa hubinta tacaddiga ilmaha. Dhammaan dadka kale ee ka shaqaynaya ama tabarucaad ka geysanaya barnaamijka, hay'adda ama xarunta, waa la idin marinayaa hubinta tacaddiga ilmaha haddii aad xiriir toos ah la leedahay carruurta masuuliyadiina ku jirta.

**<u>Tacaddi Carruureed Gobolka Ka Baxsan</u>**: Haddii aad taariikh hubin u marayso mid ka mid ah boosaska soo socda, baaritaankaaga tacaddiga waxa sidoo kale ku jira qiimeynt tacaddiyada ilmaha ee gobol kasta oo aad ku soo noolaatay shanti sannadood ee u dambeeyay.

- Boosas shaqo oo la xiriira daryeelka ilmaha ku jira guryaha korinta ama xannaaneynta (qofka shatiga haysta, maamulaha hoyga, daryeelbixiye, tabaruce, ama xubin qoyska ka tirsan);
- Shaqaalaha hay'ad daryeesha carruurta oo shati ka haysata Barnaamijka Shatisiinta Daryeelka Ilmaha ee ODHS oo uu qabanayo Xeerka Mudnaansiinta Qoyska (Xeerka Mudnaansiinta Qoyska) ee federaalka; ama
- Boos shaqo loo eegayo shuruudaha Xafiiska Dib u dejinta Qaxootiga ee federaalka.